

Halisaha Degmada Washington

Wax badan kaga ogow xogsidayaasha la xiriira:

- Heerkullada Daran ee Xagaaga iyo Jiilaalka

Macluumaad
dheeraad ah, booqo
Take5toSurvive.com

Tabi Waxyeelada

Korontada go'da, xarkaha korontada ee soo dhaca ama dabca

General Electric:
503-464-7777 or
800-544-1795


Forest Grove Light
and Power:
503-992-3250 or
503-412-2444 (after
hours)

West Oregon Electric
Cooperative:
503-429-3021 or
800-777-1276

Daadashada naqaska

NW Natural:
Haddii aad uriso
ukun quruntay ama
maaddada salfar, isla
markiiba ka bax aagga
oo wac: 800-882-3377

Ogow halisaha ka dhici kara meesha aad deggan tahay



Waxa jira haliso badan oo ku saamayn kara Degmada Washington. Xogsiduhu wuxuu ka hadlayaa dhulgariirka, fatahaadaha, duufaanada dabaysha, iyo duufaanada jiilaalka sababtoo ah waa kuwa ugu dhaw inay dhacaan ama sababi kara waxyeello baahsan. Yoolkaagu waa inaad wax ka barato saamaynaha suurtoogalka ah ee halis kasta ay keeni karto si aad diiradda u saari karto hawlahaaga u diyaarsida.

U diyaarsanaw saamaynaha

Waxa muhiimka u ah u diyaarsanidu waa ogaanshaha halisaha ka dhici kara aaggaaga iyo sida ay u carqaladeyn karaan noloshada. Inaad u diyaarsanaato saamaynaha fatahaadaha, dhulgariirka, duufaanada

jiilaalka, duufaanada dabaysha, waxaad u diyaarsan tahay saamaynaha halisaha kale ay keeni karaan. Wax ka baro halisaha kale adigoo akhrinaya xogsidaha Take 5, Heerkullada Daran ee Jiilaalka iyo Xagaaga.

Fatahaadda



Fatahaaduhu sida badan waxay ka dhacaan ililimaha iyo laagaha Degmada Washington, laakiin sidoo kale waxay ka dhici karaan meelaha hoose. Laba dhacdo cimileed ayaa keena fatahaado Degmada ka dhaca: roob wayn oo muddo kooban socda, gaar ahaan marka dhulku sii qoyanaa ama baraf lahaa, iyo roobab waawayn oo muddo dheer socda. Saamaynaha fatahaadaha waxa kamid ah:

- dadka ayaa u baahan inay ka baxaan guryahooga oo ay gabbaad raadsadaan
- waxyeello maal oo baaxad leh
- ganacsiyada xirmaya waxay saamaynayaan dhaqaalaha maxalliga ah
- waddooyinka ayaa xirmaya iyo carqalado kale oo gaadiidka ah

Dhulgariirka



Dillaacyada firfircoon ee daran ee keeni kara dhulgariirka waa lagu yaqaan Degmada Washington. Cascadia Subduction Zone wuxuu ku yaala meelo ka baxsan xeebaha Oregon iyo Washington wuxuuna si wayn u saamayn karaa aaggeena. Si ka duwan duufaanada jiilaalka iyo fatahaadaha, dhulgariirku

bilaa digniin ayuu ku dhacaa. Si aad wax badan uga barato dhulgariirka Degmada Washington, akhri xogsidaha Take 5 ee U Diyaarsanida Dhulgariirka. Saamaynaha dhulgariirka waxa kamid ah:

- Waxyeello soo gaarta guryaha iyo dhismayaasha kale ee dadwaynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay

Earthquakes, continued

- Dhaawacyo iyo dhimashooyin badan
- Waxyeello soo gaarta waddooyinka iyo buundooyinka taasi oo adkaynaysa ama meesha ka saaraysa in la shaqo tago, dugsiga la aado, daryeelka maalinta la tago, iwm. iyo in tukaanada dib alaab loogu doono

- Waxyeelada soo gaarta adeegyada waxay keentaa korontada oo go'da, biyaha oo go'a, iyo bullaacadaha oo shaqayn waaya (biyaha musqusha la raaciyo suurtoqali mayso). Wax badan ka baro fayodhawrka masiibada adigoo booqanaya [EmergencyToilet.org](https://www.emergencytoilet.org)

Duufaanada Jiilaalka



Duufaanka jiilaalku sida caadiga ah waa dhacdo sii socota dhawr maalmood oo ku lug leh baraf, roob baraf ah, iyo/ama heerkullo baraf gaarsiisan. Duufaanka jiilaal saamayntiisa waxa kamid ah:

- Baraf dhawr hiish ah ama baraf waxyeello leh

- Dhimasho iyo waxyeello hantiyeedy
- Korontada, taleefanka, iyo internetka oo go'a oo maqnaada dhawr maalmood
- Waddooyinka barafku daboolo oo badbaadada wadista baabuurta halis ku ah
- Dugsiyada oo dhawr maalmood iska xirnaada

Duufaanada dabaysha



Duufaanka dabayshu waa mid caadi ahaan muddo gaaban socda oo ku lug leh dabaylo waxyeello leh oo ku socda in ka badan 50 mayl saacaddii. In kastoo duufaanada dabayshu ay dhif iyo naadir noqdaan tornaado, way dhacaan waxayna keeni karaan dhaawac iyo waxyeello hanti oo baaxad leh. Duufaanka dabaysha saamayntiisa waxa kamid ah:

- waddooyinka oo u xirma geedo soo dhacay ama qashinka
- korontada oo go'da
- ganacsiyada ama dugsiyada oo xirnaada dhawr maalmood
- qashin aad u badan oo ay tahay in la qaado